

Liiska codsiga ee gunooyinka shaqo la'aanta ka dhalatay aafada cudurka ee la balaarshay.

Waxaad u qalmi kartaa gunooyinka haddii aadan awoodin inaad shaqayso COVID-19 awgiis.

Qaybaha qaar waxaa ku jira:

- Gobtaada shaqada ayaa la xiray, ma aadi kartid shaqada, waa inaad shaqada iskaga tagtaa ama aad xiliyo kooban shaqaysaa.
- Waxaad tahay qandaraasle madax banaan, qof ganacsi leh ama mushaarkaaga iyo saacadahaaga shaqada ayaan loo gudbin Employment Security (Amaanka Shaqada) --Shaqadaadana waxaa gaartay saamayn ama ganacsigaaga ayaa xiran.
- Waxaad u baahan tahay inaad daryeesho cunugaaga oo aan aadi karin dugsiga ama xarunta daryeelka maalintii

[Aarag qaybo kale oo la xariira cudurka COVID-19.](#)

Si aad ugu qalanto gunnooyinka shaqo la'aanta ee la balaarshay:

- Waa inaad marka hore codsataa gunnooyinka caadiga ah ee shaqo la'aanta kadibna lagu diidaa codsigaaga. (Sharciya ayaa qasab ka dhigaaya arintaan). Haddii aadanba mar hore codsan aana lagu diidin, akhri xogta shuruudaha u qalmida ood [ka helayso webseetkeena](#). Sidoo kale arag [Aalada Hubinta U qalmida](#) iyo [Liiska codsiga](#) ee gunnooyinka caadiga ah.
- Waa inaad shaqaysay qaar kamid ah saacadaha sanadka aad gunnada qaadanayso ayna shaqo la'aan kugu dhacday COVID-19 awgiis. Sanadkaaga shaqada ayaa ah afar rubuc ee ugu horeeya shanta rubuc sanad ee aad dhamaysatay kahor asbuuca aad codsiga dirsanaayo.

Kahor intaadan codsan:

Aruurso xogta aad ugu baahan tahay samaynta codsiga:

- Isla xogta shaqsiga ah, taariikhda shaqada iyo xogta baanka ee aad galisay codsiga gunooyinka caadiga ah ee shaqo la'aanta.
- Mid ama ka badan oo kamid ah **2019** dukumiintiyadaan, haddii aad tahay qof iskiis shaqo u abuurtay, qandaraasle madax banaan ama aanaan haynin xogta mushaarka aad qaadan jirtay.
 - 2019 IRS Schedule C, K-1, F
 - 2019 IRS Schedule 1125-E

- 2019 IRS 1040-SE
- 1099-Misc (2019)
- Canshuur celinta 2019 (1040 hal qof ama lamaane)
- 2019 W-2 (aana ahayn qofka ganacsigiisa ka shaqaysta)

Cadaynta **2019** mushaarka aad qaadatay **rubuca waqtiga shaqada:**

Ka fiiri tirooyinka diiwaankaaga jeega, cadaynta faaiidooyinka iyo khasaarada ganacsiga, xaashida baaqiga iyo warbixinada kale ee xisaabaadka.

Sida loo codsado:

- [Soo dagso tasmadaan](#) si aad u hesho caawimaad iyo tilmaamo faahfaahsan.
- Waxaan ku talinaynaa inaad oonleen ku codsato. Sidoo kale waxaad ku codsan kartaa taleefanka, laakiin dadka nasoo wacaaya ayaa aad u badan hadda inaad oonleen ku codsato ayaana boobsiis badan.
- Inaad codsato adoo adeegsanaaya laabtoob ama kubuyutarka caadiga ah ayaa ugu fiican. Waxaad adeegsan kartaa taleefan ama taableet, laakiin waxaa kugu adkaan kara ku socoshada bogga codsiga.
- Furo ciwaanka SecureAccess Washington (SAW) haddii aadan horay ciwaan uga furan. Kahor intaadan furan ciwaankaaga, [iska ilaali khaladaadka guud](#) adoo akhrinaaya xogta ku qoran webseetkeena.
- Ka bilow [secure.esd.wa.gov/home](#). U adeegso magacaga galitaanka iyo baasweerkaaga aalada SAW si aad u gasho Codsiga gunnada shaqo la'aanta ah ee Adeegyada oonleenka ah.

Ogsoonow tilmaamahaan qaaska ah ee loo sameeyay galinta xogta mushaarkaaga:

- Gali kaliya mushaaraadkii aad heshay 2019, xataa haddii aadan wali gudbin foomkaaga canshuur celinta ee 2019.
- Gali kaliya mushaaraadka "banaan", ha galin mushaaraadka "guud". Mushaaraadka banaan waa lacagta kuusoo harta marka canshuurta iyo caymiska lagaa jaro.
- Marka lagaa codsado mushaaraadka afar meelood meel kamid ah sanadka, gali mushaarka aad heshay 2019 ee Janaayo - Maarso, Abriil - Juun, Luuliyo - Sibteembar, iyo Oktoobar - Diseembar.

Kadib markaad codsiga dirsato lagaana aqbalo:

- Waxaad si toos ah u helayaa \$600 oo dheeraad ah asbuuc kasta ood gunnooyin codsato laga bilaabo Maarso 29 ilaa Luuliyo 25, 2020. Umma baahnid inaad cosato.
- Bilow inaad gudbiso sheegashooyinka asbuuc laha ah isla markaba—xataa kahor intaan lagaa aqbalin codsiga.

 **Employment Security Department**
WASHINGTON STATE

Employment Security Department (Waxda Amaanka Shaqada) waa barnaamij/shaqo abuurte baxsha fursad loo siman yahay. Taageerooyinka kaalmaatiga iyo adeegyadu waa diyaar markii ay codsadaan shaqsiyaadka naaftada ah. Adeegyada caawimaada luuqada ee dadka aan si fiican aqoon luuqada Ingiriiska ayaa si bilaash ah lagu helayaa. Adeegga Dhagoolayaasha Washington: 711

LA CUSBOONAYSIIYAY: 04.24.20